# Waxa Ay Tahay in aad Ogaato

## Marka aad tahay Shaqo bixiyaha Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed



OREGON Home Care COMMISSION

Employer Resource CONNECTION

Teach • Empower • Assist • Mentor

# Tusmada:


Yaa ah shaqo bixiya shaqaalaha taageerada shakhsiyeed? . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 4

Muxuu qabtaa shaqo bixiyuhu? . . . . . . . . . . . . . . . . 5

Sidee baa qof u noqon karaa shaqo bixiye? . . . . . . 7

Halkee baan ka heli karaa macluumaad ku saabsan buuxinta warqadaha loo baahan yahay? . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 9

Sidee buu shaqaaluhu lacagta u helaa? . . . . . . . . . 11

Maxaa dhacaya haddii aan helo qof cusub ee iga caawiyo in aan noqdo shaqo bixiye? . . . . . . . . 12

Tababar noocee ah ayaa iga caawin kara in aad noqdo shaqo bixiye waxtar leh, oo guuleysta? . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 12

Halkee baan ka heli karaa shaqaalaha taageerada shakhsiyeed? . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 14

Ilaha . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 14

# Yaa ah shaqo bixiya shaqaalaha taageerada shakhsiyeed?

Shaqo bixiye waa qofka ka mas'uulka ah in uu maamulo adeegyada uu bixiyo shaqaalaha taageerada shakhsiyeed (PSW)? Waxaa laga yaabaa in aad maqasho tani oo lagu tilmaamayo in ay tahay diiwaanka cida loo shaqeeyo ama shaqo bixiyaha guud.

Shaqo bixiye wuxuu noqon karaa qofka uu PSW uu caawiyo ama qof la siiyay awooda ah in uu noqdo shaqo bixiyaha shakhsiga ama mas'uulka qofka. Waalidka dhalay ilme helaya adeegyadu wuxuu noqon karaa shaqo bixiye. Dadka soo socdaa ma noqon karaa shaqo bixiye:

- Daryeel bixiye kasta oo la shaqeeya qofka helaya adeegyada;
- Xubnaha shaqaalaha ka tirsan CDDP, ganacsiga dilaalka ku dhisan, barnaamijka CIIS, Daryeelka Carruurta; ama
- Qof kasta oo wakhtiyadii la soo dhaafay laga saaray in uu noqdo shaqo bixiye isla markaana aan dib loo soo celin, dembiyada qaarkood lagu soo oogay ama lagu soo caddeeyay musuqmaasuq ama xadgudub.



# Muxuu qabtaa shaqo bixiyuhu?

## Shaqo bixiyuhu wuxuu leeyahay mas'uuliyado dhowr ah Waxaa ka mid ah:

1. Dhammeystirka dhammaan warqadaha loo baahan yahay si loo noqdo shaqo bixiye;
2. Raadinta, wareysiga iyo shaqaaleynta shaqaalaha taageerada shakhsiyeed (PSW)oo xirfad leh, haddii ay suurtagal tahay kuwo ka socda Diiwaanka Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon (Oregon Home Care Commission);
3. Samaynta jadwal shaqo oo loogu talagalay PSW;
4. La shaqaynta iskuduwaha adeegyada ama wakiilka shakhsi si loo sameeyo Heshiiska Adeeg Bixiya ODDS (DHS 4606) ee ay tahay in PSW uu saxiixo (macluumaadkan waxaa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu qoro sharaxaadda shaqada ee loogu talagalay in PSW uu raaco. La taliyaha tababarka ayaa ka caawin kara tani.);
5. U sheegida PSW waxay ay yihiin hawlaha la qabanayo, marka ay u baahan yihiin in ay dhacaan iyo sida loo qabanayo;
6. Hubinta la hubinayo in la qabtay hawlihii ka hor inta aanu PSW tegin maalinta;
7. La socodsiinta PSW in uu ogaado haddii aadan ku faraxsanayn sida hawsha loo qabtay iyo talo ka siinta sida fiican ee loo qabanayo;
8. La socoshada goorta iyo inta saacadood ee PSW shaqeeyo;
9. Saxiixida xaashida shaqada ee PSW ka dib marka la hubiyo in ay sax tahay;

# Muxuu qabtaa shaqo bixiyuhu?, ayaa lagu jiraa

10. Siinta PSW jawaab ku saabsan qabashada shaqadiisa ama shaqadeeda, imaanshaha shaqada, iyo hadddii isaga ama iyada ay buuxinayaan waxyaalaha aad filayso.

11. Diyaarinta PSW bedel ah haddii shaqaaluhu uu jirado ama fasax ka qaadanayo shaqada;

12. Shaqo ka sii-deynta PSW haddii aadan ku faraxsanayn sabab kasta ha aheetee, sida waxqabadka shaqo ama imaanshaha shaqo;

Shaqo bixiyayaasha caawimaad uga baahan qaar ka mid ah hawlahani wuxuu la xiriir karaa wakiil. Wakiil waa qof oggolaada in uu caawimaad ka geyso hawlaha gaarka ee shaqo bixiye iyada oo qofka la taageerayo loo dhaafayo doorka shaqo bixinta.





# Sidee baa qof u noqon karaa shaqo bixiye?

- Talaabada u horeysa oo lagu noqonayo shaqo bixiye waa in lala hadlo iskuduwaha adeegyada ama wakilka shakhsi.
- Talaabada xigtaa waa in la buuxiyo warqada muhiimka ah ee Iskaashiga Dadweynaha, LLC ay kuu soo diri doonaan.
  - » Xirmada shaqo bixiyaha waxaa ka jir doona liiska hubinta, warqad muhiim ah ‘cover page’ iyo foomam loo baahan yahay.
  - » Waa in aad u buuxisaa si dhammeystiran isla markaana sax ah. Foomamka intooda badani waxay imaan doonaan iyaga oo hore loogu sii qoray macluumaadkaada.
  - » Haddii aad fahmi weydo warqada, la xiriir **xarunta adeega macmiilka PPL 1-888-419-7705**. Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa iskuduwahaaga adeegyada ama wakiilkaaga shakhsi ama qof aad ku kalsoon tahay si uu kuu caawiyo. Waxaad ka codsan kartaa qof aad ku kalsoon tahay in uu noqdo shaqo bixiyaha isaga oo kaa wakiil ah.

## Muxuu sameeyaa Iskaashiga Dadweynaha, Kooban?

**PPL waxay bixisaa wakiilka adeegyada maareynta dhaqaale (FMAS) iyaga oo kaa caawinaya in aad shaqaalahaaga lacag  siiso iyo canshuurta lagaa hayo iyo warbixinta canshuurta iyada oo kaa wakiil ah. PPL waxay shaqaalahaaga u diri doonta jeegaga.**

- Waa in aad dib u eegtaa isla markaana saxiixdaa foomamka soo socda ee PPL ay kuu soo diri doonto ama waxaan iyaga ka soo min guurin kartaa halkan:
  - » Codsiga loogu talagalay Lambarka Aqoosiga Shaqo bixiyaha (Foomka SS-4 ee IRS).
  - » Balanta Shaqo bixiyaha/Lacag bixiyaha ee Wakiilka (Foomka IRS ee 2678). Adeegyada Dakhliga Hoose ayaa u baahan foomkan.
  - » Oggolaanshaha Macluumaadka Canshuurta iyo Awoodda Qareen ee loogu talagalay Wakiilnimada (foomka 150-800-005). PPL waxay kani u diri doontaa Waaxda Dhakhliga Oregon iyada oo kaa wakiil ah.
  - » Foomka Qofka Mas'uulka ah (haddii qof ku caawin doono).

Haddii aanay wax ahayn, la socodsii PPL waxaanad heli doontaa xirmo macluumaad oo sax ah.

- Marka aad shaqaaleysiiso shaqaalaha taageerada shakhsiyeed, shaqaalahaaga ayaa hayn doona xirmada foomamka isdiiwaangelinta si aad u buuxiso. Waxaad u baahan doontaa in aad shaqaalahaagu buuxiyo isla markaana saxiixo foomamka soo socda ee ka socda xirmadaada macluumaadka:
  - » Aqoonsiga Canshuur Haynta La Isku Oggolyahay ee Shaqaalaha (W-4)
  - » Foomka Caddeynta U qalmida Shaqo I-9 Si aad u xaqiijiyo in uu/ay si sharci ah uga dhex shaqaysan kara/karto Maraykanka. Waa in aad soo aragtaa warqado asal ah, aanu wakhtigoodu dhicin (lama oggola nuqulada sawirka ama sawirrada) isla markaana saxiix foomka adiga oo dhahaya in aad sida lagu faray samaysay.
- Waxaad wicitaan telefoon oo iswada ka heli doontaa PPL kaasi oo kuu sheegaya in aad si sax u buuxisay wax kasta ama in lagaa rabo in aad saxdo ama wax ku darto.

## Fariin mu hiim ah:

**Shaqaalaha taageerada shakhsiyeed ma bilaabi karo shaqo ilaa aad labadiinaba dhammeystiraysaan dhammaan warqadaha loo baahan yahay iyo inta hawsheeda la qabanayo isla markaana laga oggolaanayo. Warqadaha waxaa looga baahan yahay shaqaalaha taageerada shakhsiyeed ee kasta oo aad shaqaaleysiiso.**

# Halkee baan ka heli karaa macluumaad ku saabsan buuxinta warqadaha loo baahan yahay?

PPL waxay bixisaa soo bandhigidda nidaamka PowerPoint waxyaalo la duubay oo dhanka internet-ka; ka raadi http://www.publicpartnerships.com/programs/oregon/fmas/index.html.

Xusuusnow, waxaad wici kartaa adeega macmiilka PPL Haddii aad u baahan tahay caawimaad.



## Sidee baa PPL u heshaa warqadahayga?

Adiga iyo PSW aad leedahay waa in dirtaan warqadaha PPL ee la dhammeystiray. Email, fax ama boosta ayaad ku diri kartaa macluumaadka PPL:

Email-ka: **PPLORFMAS@pcgus.com**

Fax-ka ama Efax-ka: **1-844-399-6593**

Boosta: **Public Partnerships – OR FMAS**
**P.O. Box 50040**
**Phoenix, AZ 85076**

## Sidee baan ula xiriira PPL?

Waxaad la xiriir kartaa adeega macmiilka PPL adiga oo wacaya:

**1-888-419-7705 (Ingiriisiga);**

**1-888-419-7720 (Isbaanishka);**

**1-888-419-7734 (Af-Ruushka);**

**1-888-360-5899 (TTY).**

Waxaad sidoo kale email u diri kartaa:

**PPLORFMAS@pcgus.com**

Website-ka PPL waxaad ka heli kartaa:
**http://publicpartnerships.com/programs/Oregon/fmas.**

# Sidee buu shaqaaluhu lacagta u helaa?

Si qofka loogu oggolaadu in uu kuu shaqeeyo isla markaana lacagta u helo, isagu ama iyada waa in uu/ay:

- Dhammeystaa/dhammeysataa isla markaana ku gudubtaa/gudubtaa baaritaanka taariikh dembiyeedka laba sano oo kasta (ama ka soo horeysa haddii la codsado);
- Buuxiyaa/buuxisaa oo saxiixaa/saxiixdaa Codsiga Diiwaan gelinta Daryeel Bixiyaha iyo Heshiiska;
- Ka qaybgalaa/gashaa tababarka waajibka ah;
- Awoodaa in uu/ay si sharci ah uga shaqaysan karo/karto Maraykanka;
- Ku gudbtaa/gudubtaa baaritaannada gobolka iyo federaalka;
- Haystaa/haysataa lambarka daryeel bixinta Medicaid oo la oggol yahay oo meel fiican taagan;
- Buuxiyaa/buuxisaa oo soo celiyaa/celisaa xirmada shaqaalaha PPL;
- Saxiixaa/saxiixdaa Heshiiska Adeeg Bixiyaha ODDS (DHS 4606);
- Xaqiijiyaa/xaqiijisaa in Oggolaansho Hore oo Adeeg (SPA) ee ku jira eXPRS uu muujinayo tirada saacadaha ee hada iyo heerka lacageed ee ku qoran heshiiskiisa/heshiiskeeda adeeg;
- Isticmaalaa/isticmaashaa eXPRS si uu u geliyo/ay u geliso waqtigiisa/waqtigeeda isla markaana loo daabacdo xaashida shaqada si aad u saxiixdo;
- Xaashida shaqada oo saxiixan waqkhtigii loogu talagalay ugu soo celiyaa/celisaa CCDP ama Ganacsiga dilaalka ku dhisan; iyo
- La socdaa/socotaa jadwalka lacag bixinta.

## Maxaa dhacaya haddii aan helo qof cusub ee iga caawiyo in aan noqdo shaqo bixiye?

Waxaad go'aansan kartaa qofka aad jeclaan lahayd in uu kaa caawiyo in aad buuxiso mas'uuliyadahaaga shaqo bixiyenimo. Haddii aad jeclaan lahayn in aad xulato qof cusub, sida ugu dhakhsaha badan u la socodsii iskuduwaha adeegyada ama wakiilka shakhsi si qofkaasi uu kuula shaqayn karo inta lagu jiro nidaamkan.

## Tababar noocee ah ayaa iga caawin kara in aad noqdo shaqo bixiye waxtar leh, oo guuleysta?

Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon waxay bixisaa, barnaamij tababar oo lacag la'aan ah, oo tabaruc ah oo loogu talagalay dadka raba in ay noqdaan shaqo bixiyayaal waxtar leh, oo guuleysta. Shakhsiga iyo qofka u shaqeynaya shaqo bixiye ahaan wuu ka qayb qaadan karaa. Waa wax wanaagsan in lagu qayb qaato tababarka ka hor inta aadan shaqaaleysiin shaqaalaha taageerada shakhsiyeed si aad u ogaatid waxa la filayo shaqo bixiye ahaan, laakiin waxaa la heli karaa wakhti kasta.

La taliyaha tababarka ayaa ku siin kara Tilmaamaha Tababarka Macmiilka-Cida Loo Shaqeeyo, xaashiyaha ilaha iyo waxyaabaha kale.

### Xaashiyaha ilaha

- **Xaashida Ogaanshaha Waxa Aan U Baahanahay**
- **Abuuritaanka Xayaysiiska ah Caawimaad Baa Loo Baahan Yahay**
- **Xaashida Ilaha Wareysiga**
- **Abuuritaanka Sharaxaadda Shaqada**
- **Tani Ma tahay Shaqaale Aniga igu Wanaagsan?**
- **Calaamadaha Digniinta ah ee Shaqaalaha aan La aqbali karin**
- **Sida loo Dejiyo Qorshe Bedel ah**
- **Ka hortagga Musuqmaasuqa iyo Ka Faa'iidaysiga Dhaqaale**

## Waxyaabaha xiriirku ka dhexeeyo

- Su'aalaha Wareysiga
- Hubinta Su'aalaha Tixraaca
- Sharaxaadda Shaqada
- Qorshaha Bedelka ah
- Isqoritaanka Maalin kasta
- Jadwalka Toddobaadlaha ah
- Jadwalka Toddobaadyada Badan Leh
- Qiimeynta Bilowga ah
- Qiimeynta Waxqabadka
- Diiwaanka Lagu Qoro Masaafada La Socdo
- Diiwaanka Lacagta
- Liiska Hubinta Badbaadada Guriga
- Liiska Hubinta Qorshaynta Xaalada Degdega ah
- Liiska Hubinta Xaalada Degdega ah

Far waaweyn iyo waxyaabo la turjumay ayaa la helayaa.

## Macluumaadka loo baahan yahay

**Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ama si looga qayb qaato barnaamijka, la xiriir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon 1-877-867-0070 ama email u dir OHCC.ERC@dhsoha.state.or.us.**

# Halkee baan ka heli karaa shaqaalaha taageerada shakhsiyeed?

Si aad u hesho shaqaalaha taageerada shakhsiyeed oo la aqoonsan yahay ama tababaran, isticmaal diiwaanka gobolka ee Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon. Diiwaanku wuxuu kaa caawin doonaa in aad isbarbardhigto. Shaqaalaha adiga oo ku saleynaya waxa aad raadineyso. Si aad u iticmaasho Diiwaanka, booqo www.or-hcc.org.

Haddii aad marka kasta caawimaad uga baahan tahay isticmaalka Diiwaanka, fadlan wac **Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon 1-877-867-0077.**

# Ilaha

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mas'uuliyadaha sharci ee ahaanshha shaqo bixiye, la xiriir la xiriir hay'adaha kala duwan ee gobolka iyo federaalka.

## Xafiiska Shaqaalaha iyo Warshadaha ee Oregon (BOLI):

BOLI wuxuu bixiyaa xaashida xaqiiqda oo ka hadlaysa mawduucyo kala duwan wuxuuna taageero farsamo siiyaa shaqo bixiyayaasha. Waxaad heli kartaa macluumaadka adiga oo booqda www.oregon.gov/boli ama wacaya Qaybta Taageerada Farsamo **971-673-0824**.

## Adeegyada Dakhliga Hoose:

IRS waxay ka jawaabtaa su'aalaha inta badan la isweydiiyo ee ku saabsan Lambarada Aqoonsiga Shaqaalaha (EIN). Xusuusnow, PPL waxay kaa caawin doontaa in aad codsato EIN aad leedahay. PPL waxay Codsiga Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha (Foomka SS-4 ee IRS) u gudbin doonaa IRS marka aad buuxiso. Waa qayb

ka mid ah xirmada diiwaan gelinta PPL. IRS waxay sidoo kale bixisaa Daabacaada 926: "Tilmaanta Canshuurta Shaqo bixiyaha ee Guriga ." Tilmaantan la raacayaa waxay bixisaa macluumaad ku saabsan waxa sharci ahaan la iskaga baahan yahay marka la shaqaaleysiinayso shaqaale si uu kaaga caawiyo guriga. Ma aha in aad ka walwasho, PPL waxay kaa caawisaa in aad buuxiso shuruudaha lagu sharraxay Daabacaada 926.

Waxaad booqan kartaa website-ka IRS www.irs.gov ama la xiriir IRS adiga oo wacaya **1-800-829-1040**.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan Barnaamijka Tababarka Macmiilka-Cida loo shaqeeyo iyo si loo helo qalabka, ilaha, iyo Tilmaamaha La Raacayo ee Macmiilka-Cida loo shaqeeyo, fadlan la xiriir Barnaamijka Isku xirka Ilaha Cida Loo Shaqeeyo ee la shaqeeya Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon:

**Email:** **OHCC.ERC@dhsoha.state.or.us**

**Telefoonka:** **1-877-867-0077**

Lane County Developmental Disabilities Services
541-682-3695

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. La xiriir Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon (Oregon Home Care Comission) 1-877-867-0077 ama email u dir OHCC.ERC@dhsoha.state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

Find us on Facebook

550 Capitol St., NE
Salem, Oregon 97301
1-877-867-0077
http://www.oregon.gov/dhs/spd/pages/adv/hcc/index.aspx

SM APD 0641 (06/2018)